



Kondhiloom

Kondhiloom waxaa sababo fiirus, oo la dhaho humant papillomvirus, oo loo soo gaabiso HPV. Kondhilom astaamihiiisa waa badanaa ka soo bax, oo wuxuu ku faafa galmada siilka, futada iyo afka oo difaac leheen. Fiiruska wuxu kale uu ku faafi siigeysi iyo jirka oo la isku xoqo. Sameytiisa sidaas ma u dhib badna, laakin ka soo baxa qofka wuu dhibsankara.

Astaamaha kondhilomka

Qasab ma ahan inaa isku aragtid astaamaha kondhilomka. Haddii aad isku aragtid astaamo waxey qaadan dhowr isbuuc, ilaa dhowr bilood, oo markaasna isku arkeysid ka soo bax. Ka soo baxay waxey ka soo bixi xubnaha galmada ama duleelka futada ama afka tubada kaadida. Ka soo baxa waa kuskus, wareeg ama sidii geeso camal oo la isku geeyay. Marmar la arkikaro. Adiga waxa isk arkii kartaa cuncun, maqaarka baa ku dilaaci oo markaas dhiigaayo iyo xubnaha galmada oo ku xanfafo markaa qabto kondhilom. Dumarka waxey dareemi xannuun markey galmo suubinaayaan. Marmar oo dhif ah kondhilom afka baa laga helaa. Marmar fiiruska kondhilomka maqaarka buu iskaga jira bilooyin, ilaa sanad intaa iska arkin astaamaha.

Iska baar kondhilom/HPV

Ma jiro baaritaan joogto lagu arkikaro hadii aad qabto kondhilmo. Laakin waxa ku baarikaro dhakhtar hadii aad is leedahay in kondhilom kugu dhacay. Baaritaanka caadiyan ma ahan bilash

Daaweyn

Infekshanka HPV iskiis buu u reysan, laakin waqti dheer buu qaadan. Ka soo baxa xitaa waa ey iska reysanaayaan. Ka soo baxa waxa lagu daaweynkara boomaato qaas ah ama waxa jirto daawo la mariyo ka soo baxa. Ka soo baxa waa xitaa la gubikara ama waa la qabooyinkara. Daaweynta waxa kala soo xiriiri dhakhtar iyo daaweynta waxey qaadan waqti kala duwan oo waxey ku xiran tahay habka daaweynta.

Fiiruska wuxu ku jirikara darbiga xubnaha ama maqaarka, oo sidaas daraadeed ka soo baxa wuu kugu soo noqon. Haddii markale infekshanka kugu dhaco ka soo baxa wuu kugu soo noqon. Waa in markaas daryeel cusub lagu suubiyaa. Kondhilom kama mid aha cudurada ku

qoran sharciga difaacida cudurada, oo sidaas daraadeed daaweynta ma ahan bilash.

Waa muhiim inaa ku fakirtaa markey noqoto kondhilom

Kondhilom ma saameyneso ilmo dhallitaanka. Inta ey hooyada uurka leedahay waxa ku badanaayo ka soo baxa, laakin weey baabaayaan markey dhasho kadib. Waqtiga foosha waxa halis ah iney canuga ku daarato fiiruska kondhilomka.

Bacda guska waa difaac wanaagsan markey noqoto faafinta kondhilom. Waxa qasab ah in bacda ey dhabooleyso xitaa meelaha ka soo baxa. Aad bey u wanaagsan tahay inaa qofka aad la nooshahay u sheegtid inaa qabtid kondhilom sidaa labadiina isku difaacikartiin.

Kondhilom waxa sababo dhowr nooc oo kamid ah HPV. Dhowr kamid ah HPV waxey sabab u yihiin isbadalo dumarka qeybaha hoose uga dhaco. Muddo dheer kadib isbadalada waxey sababaayaan kansarka dumarka makaanka uga dhaco. Sidaas daraadeed bey muhiim u tahay in dumarka ey suubiyaan baaritaanka dhacaanka hoose dhowrkii sano halmar, oo isbitaalka baa kontorool ugu yeeraayo. Qaar kamid ah HPV waxey xitaa sababan kaansarka futada, guska oo haddii xitaa noocyada kaansarka eysa u badneen sida kaansarka makaanka.

Adiga waa iska tilaalikarta qaar kamid ah HPV. Arrintaas waxaa fiican inaad suubiso intaa galmada koowad suubin. Talaalka wuxu difaac kaa siin fiirusyada oo caadiyan keeno ka soo baxa ama sababo kaansarka. Haddii aad tilaalantahay waa muhiim adiga oo dumarka ah inaa tagto baaritaanka qeybta hoose, maadaama ey jiran dhowr nooc oo fiiruska oo kamid eheen kuwa talala ahaan aad difaaca ka haysato.

